



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Dowlad Goboleedka Galmudug

Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال الفدرالية

حكومة إقليم جلمدج

مكتب الرئيس

Galmudug State
Office of the President

Tix: XMGM/02/0019

Tr: 23/02/2017

Hambalyo Hambalyo Hambalyo

Dowlad Goboleedka Galmudug waxay halkaan uga diraysaa hambalyo iyo bogaadin Ra'iisul Wasaraha Cusub ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane **Xassan Cali Kheyre** oo loo magacaabay xilka Ra'iisul Wasaarahaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Xulashada Ra'iisulwasaaraha cusub ayaa muujinaysa in Madaxweynuhu uu si degan oo Soomaalinimo kujirto usoo doortay Ra'iisul Wasaare aqoon leh, dhalinyaro ah, lagu yaqaan karti iyo hufnaan. Xulashadan waxaa kale oo ay muujinaysaa in Madaxweynuhu uu ka dhabeeeyey balan qaadkii uu shacabka u sameeyey oo ahaa in dowladdiisu ay ka shaqeyn doonto Sareynta Sharciga, taasna waxaa lagu gaari karaa oo kaliya in dalka taladiisa loo dhiibo dhalinyaro aqoon, wadanimoo iyo hufnaan lagu yaqaan. Waxaa ummadda Soomaaliyeed ka rejeyneynaa xildhibaanaada sharafta leh in Ra'iisul Wasaarahaa cusub ay gacan ku siiyan sidii loo ansixin lahaa magacaabistiisa iyo lashaqeyntiisa

Dowlad Goboleedka Galmudug waxay Illahay uga baryeysaa Ra'iisul Wasaarahaa cusub inuu u horseedo ummadda Soomaaliyeed nabad, midnimo, horumar iyo cadaalad ay kaga kabsadaan dhibaatada iyo abaaraha hareeyey.

Dhammaad

Xaafiiska Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Galmudug